

“Workers' Compensation for New Hampshire Workers” – (Somali)

New Hampshire Department of Labor

95 Pleasant Street, Concord, NH 03301

603-271-3176

www.labor.state.nh.us

Magdhawga Shaqaalaha ee loogu tala-galay Shaqaalaha
New Hampshire

Faa’iidooyinka Caafimaadka iyo Naafonnimada ee loogu tala-galay Shaqaalaha Waxyeeladu Soo-gaadho

Haddii aad ku dhaawacantid shaqada, magdhawga shaqaaluhu (ama "workers' comp") wuxuu kaa bixin biilasha daaweyntaada. Wuxuu bixinayaa oo kale 60% mushaarka kaa baaqda kadib haddii saddex maalmood in ka badan aad shaqada ka maqnaatid. Magdhawga shaqaaluhu waa nooc caymiska ka mid ah oo dhammaan loo-shaqeeyayaasha WAAJIB ku ah in ay shaqaalahooda siiyaan.

Magdhawga Shaqaaluhu wuxuu Kafeeyaa Shaqaalaha oo Dhan

Kuma xidhnaa cidda khaladka dhaawca samaysay. Xaaladaha intooda badan, shaqaaluhu magdhawga wey heli karaan, oo kuna jiraan shaqaalaha nus-gelinka shaqeeya, kuwa ku meelgaadhka ah, iyo kuwa socotada ah. Shaqaalaha aanan sharciga haysan waxay u-qalmaan noocyo badan oo faa’iidooyinka magdhawga shaqaalaha ah, kuna jirto bixinta biilasha daaweynta.

Soo-sheegidda Waxyeelooyinka

Haddii aad ku dhaawacantid shaqada, u sheeg loo-shaqeeyahaaga. Isla markiiba waxaad buuxisaa warbixinta shilka (foomka 8aWCA). Waxaad foomkan ka heli kartaa loo-shaqeeyaha. Waxaad hubisaa in aad hal nuqul la hadhid. Waxaad haysataa ilaa laba sano inaad soo-sheegtid waxyeelooyinka iyo xanuunka goobta shaqada kaa soo-gaadha, hase-yeeshe waxa ugu wanaagsan in aad isla-markiiba soo-sheegtid.

Doorashada Dhakhtarkaaga

Haddii aad ku dhaawacantid shaqada waxaad xaq u-leedahay inaad dooratid dhakhtarkaaga Waxaad kale oo aad xaq u-leedahay in aad fikir labaad heshid. Xaaladaha intooda badan, waxaad dooran kartaa dhakhtarka aad doontid.

Hase yeeshe magdhawga shaqaalaha leh "xannaanada la maareeyay," waxa laga wada waa kugu waajib inaad dhakhtar ka xulatid liis dhakhaatiir ah.

Haddii ay xaaladdaadu tahay mid shaqada la-xidhiidha, waxaad hubisaa in aad arrintaa u sheegtid dhakhtarkaaga, cusbitaalka, ama xirfadleyaasha caafimaadka ee kale. Waa iney biilasha oo dhan loo-shaqeeyahaaga u diraan, ee ma’aha in ay adiga kuu soo diraan.

Haddii waxyeelada ama xanuunka ku soo-gadhay uu shaqadaada kaaga yimid, waxaad hubisaa in dhakhtarkaagu uu warbixintiisa ku qoray. Waxaad hubisaa in uu xaaladdaada si sax ah u sheego.

Ku Soo-Noqoshada Shaqada

Waxaad hubisaa in aad dhakhtarkaaga ka qaadatay foomka (75WCA-1) oo sheegaya in aad shaqadaada ku-noqon karaysid iyo in kale, iyo haddii ay xadaysanyihiin waxyaalaha aad qaban karaysid. Hal nuqul loo-shaqeeyahaaga sii, hal nuqulna adigu la hadh. Loo-shaqeeyahaagu wuxuu ku qasbanyahay in uu u hoggaansanaado awaamiirta dhakhtarka.

Haddii Xaq-sheegashadaada La Diido

Haddii shirkadaha bixiya caymiska magdhawga shaqaalaha ay xaq-sheegashadaada diidaan, ha raja gooynin. Shirkadaha caymiska qaarkood marka ugu horeysa way diidaan xaq-sheegashooyinka iyadoo sababto tahay arrimo badan kuna jirto la'aanta dukumeentooyin caafimaad oo dhammaystiran. Waa inaad ka fakartaa dhegaysi aad ka codsatid Waaxda Shaqada si aad uga dooddid diidmadaas. Dhegaysiyada waxa qaada saraakiil maamul oo jooga daarta Waaxda Shaqada ee Concord ku taal. Qiyaastii inteeda badan kala badh shaqaalaha dhaawaca ah oo rafcaan ka codsada Waaxda wey ku guuleystaan dhegaysigood. Waxaad haysataa ilaa iyo 18 bilood oo aad ku codsan kartid dhegaysi laga bilaabo taariikhdii diidmada.

Helitaanka Gargaar Sharciyeed

Haddii aad taageero qareen u baahatid, waxaad raadsataa mid ku takhasusa magdhawga shaqaalaha. Kuma qasbanid in aad lacag jeebkaaga ka bixisid. Qareenku haddii uu ku guulaysto rafcaanka, waxaa la siinayaa 20% faa'iidooyinkaaga naafonnimada ee aan weli la bixin. Haddii aad rafcaanka ku guuldaraysatid, kuma qasbanid in aad qareenka lacag siisid.

Taageero Lega helayo waaxda shawada ee NH

Si aad xog dheeraad ah u heshid ama taageero, waxaad ka waacda Waaxda Shaqada ee New Hampshire 603-271-3176. Dadka jooga waxay ka caawiyaan shaqaalaha dhaawacma sida ay u fahmaan, ugu andacoodaan, u ilaaliyaanna xuquuqdooda. Waxaad waydiisaa Waaxda Xaq-sheegashada Magdhawga Shaqaalaha (Workers' Compensation Claims Department). Ama waxaad aaddaa Website-ka Waaxda

<http://www.labor.state.nh.us/>

This worksheet was created by the NH Coalition for Occupational Safety and Health, based on information provided by the NH Department of Labor. Funding was provided by the Endowment for Health. Revised June 2008 and January 2009.